DEPARTMENT OF CHILDREN, YOUTH, AND FAMILIES
LICENSING DIVISION

Siyaasada Heshiisyada

Policy Agreements

MAGACA	TAARIIKHDA

Siyaasada heshiisyada waa in laguugu caawiyo fahanka Xeerarka Maamulka Washington (WAC). Waa muhiim in aad garanaysid xeerarka laxiriira noqoshada waalid wax korinaya. Waxaad heli kartaa nuqul kusaabsan xeerarkaan oo uu kusiiyo rukhsad bixiyahaaga waxayna kaaga jawaabi doonaan su'aal kasta oo aad qabtid. Sidoo kale waxaad uga akhrin kartaa qaab toos oo internetka ah adiga oo kafiiriya WAC 110-148 boggaan internetka ah http://app.leg.wa.gov/wac/. Qaybahaan soo socda waa qaar kamid ah xeerarka sida dhow ula xiriira ammaanka ilmaha iyo ficnaan-shihiisa.

Fadlan Sixiix Qayb Kasta

Edbin

WAC 110-148-1615

Waxaan adeegsan doonaa edbin kuhaboon da'da ilmaha iyo heerka koritaanka waxaana dejin doonaa xuduudo waxaana isticmaali doonaa qaabab wanaagsan oo hagid ah kuwaas oo kor u qaadaya xakamaynta-nafta, masuuliyada-nafta, jiheynta-nafta, kalsoonida-nafta iyo wada shaqaynta.

Qaababkeyga wanaagsan waxaa kamid noqon doona: kuhagida caruurta lagu hago hawl kale, siinta doorashooyin marka ay munaasab tahay, waqti go'an oo ah sida qaab hagid, u oggolaanaya ilmaha waqti uu kubedelo dhaqankiisa/dhaqankeeda, u qorsheynta si looga hortago mushkiladaha; iyo adeegsiga fullin wanaagsan iyo in ilmaha lagu guubaabiyo in ay muujiyaan oona cabiraan dareenkooda iyo fikradahooda.

Ma isticmaali doono ciqaab adinka ah ama xad gudub afka ah, mana baylihi doono, mana dulleyn doona ama kusameyn doono ciqaab cabsi geli ah middaas oo ay kamid tahay laakiin aanan ku ekayn: dharbaaxid, nacaladayn, hanjabaad, dulleyn ama u handadid, iyo/ama in qolalka lagu soo xiro ama qaabab soo dhexgala baahooyinka aasaasiga ah ee ilmaha, ay kamid tahay kacelin cunto.

Anigu waan fahansanahay in keliya daryeel bixiyayaal la oggolaaday iyo aniga naftayda aynu masuul kanahay edbinta. Masuuliyadaasi ma ahan mid lasiin karo ilmaha. Waxaan oggolaan doonaa xiriir lala yeesho adeeg bixiyayaasha ilmaha iyo kuwo kaleba oo ay ka mid tahay in xiriir lala yeesho shaqaalaha Waaxda Carruurta, Dhallinyarada iyo Qoysaska (DCYF) ee cunuga, wakiilayaasha sharciga ah, waalidiinta sharciga ah iyo xubno kale oo qoyska ka tirsan.

Waxaan sameyn doonaa qorshe qoran oo loogu talogalay edbinta caruurta middaas oo aan lasameyn doono rukhsad bixiyahayga waxaana khasab igu ah in aan raaco qorshahaas.

Fadlan u isticmaal meeshaan banaan si aad ugu sharaxdo hawlahaaga edbinta adiga oo adeegsanaya tusaalooyin iyo koox da' gaar ah:

SIXIIXA XIRIIRKA AASAASIGA AH	TAARIIKHDA
SIXIIXA XIRIIRKA LABBAAD	TAARIIKHDA

Diinta

WAC 110-148-1520 (8)

Waxaa khasab kugu ah in aad dareen u yeelatid diinta ilmaha ama hawlaha diimeed. Waa in aad siisid fursad kufilan oo diinta ama tababarka diimeed ah iyo kaqayb qaadashada kuhaboon diimaha uu ilmuhu rumeysanyahay. Lagaagama baahna in ilmana uusan kaqayb qaadan hawlaha lidka ku ah waxyaabaha ay rumeysanyihiin.

a) Fadlan u isticmaal meeshaan banaan si aad ugu sharaxdid qorshahaaga horjoogida caruurta loogu talogalay kuwaas oo doortey in aynaan kaqayb galin adeegaha diimeed ee khuseeya qoyskaaga.

SIXIIXA XIRIIRKA AASAASIGA AH	TAARIIKHDA
SIXIIXA XIRIIRKA LABBAAD	TAARIIKHDA

Baahooyinka Aasaasiga ah iyo Dhaqanka

WAC 110-148-1520

Waan oggolahay in aan buuxiyo baahooyinka aasaasiga ah ee ilmaha iyo in aan kucaawiyo aqoonsashada dhaqanka ilmaha. Haddii aan geliyo ilmo daryeelkayga oo aanan u lahayn aqoon iyo xirfado in aan taageero aqoonsashada dhaqanka ee ilmaha, waxaan caawimaad ka codsan doonaa shaqaalaha ilmaha loo xilsaaray si aan u helo xirfadahaan.

Waan oggolahay in aan kucaawiyo baahooyinka aqoonsashada iyo dhaqanka ee caruurta Asal ahaan u dhashay Mareykanka una hoggaansamo dhammaan qaanuunada dowlada iyo gobolka khuseeya caruurta Asalka ahaan u dhashay Mareykanka kuwaas oo kujira hoosta daryeelkayga. Waan oggolahay in aan u hoggaansamo dhammaan qorshooyinka kiiska dhaqameed ee gaarka ah ee loogu talogalay caruurta Asal ahaan u dhashay Mareykanka.

SIXIIXA XIRIIRKA AASAASIGA AH	TAARIIKHDA
SIXIIXA XIRIIRKA LABBAAD	TAARIIKHDA

Sir ahaanta

WAC 110-148-1410

1. Waan fahansanahay in macluumaada kusaabsan ilmaha ama qoyska ilmaha ay tahay mid sir ah oona khasabtahay in keliya lala wadaago dadka kulug leh qorshaha kiiska ilmaha loogu talogalay.

   Waan oggolahay in aan la tashto rukhsad bixiyahayga ama shaqaalaha ilmaha loo xilsaaray ee loogu talogalay hagida ku saabsan wadaagista macluumaadka lala wadaago dadka ku lugta leh qorshaha kiiska ilmaha.

SIXIIXA XIRIIRKA AASAASIGA AH	TAARIIKHDA
SIXIIXA XIRIIRKA LABBAAD	TAARIIKHDA

Sigaar cabid

WAC 110-148-1495

1. Waan fahansanahay in aan mamnuuci doono sigaar cabid lagu cabo meelaha lagu noolyahay ee guri kasta ama xarunta daryeelka caruurta iyo baabuurta gudahooda marka ilmaha lagu qaadayo baabuurta.
2. Waan fahansanahay in ay dhici karto in aan u oggolaado dadka waaweyn in ay sigaarka kucabaan banaanka guriga ama meel ka fog caruurta sida waafaqsan xeerka RCW 70.160.075.
3. Sidoo kale aniga waan fahansanahay in wax kuqoran qaybtaan aanan loola jeedin in uu soo dhexgalo xafladaha iyo dhaqanka ama diimeedka dadka Asal ahaan u dhashay Mareykanka ee kulug leh isticmaalka tubaakada.

SIXIIXA XIRIIRKA AASAASIGA AH	TAARIIKHDA
SIXIIXA XIRIIRKA LABBAAD	TAARIIKHDA

Horjoogida

WAC 110-148-1610

(1) Waan fahansanahay in ay khasab igu tahay in aan bixiyo ama habbeeyo daryeelid iyo horjoogid kuhaboon da'da ilmaha, heer horumarin xirfadeed, iyo xaalad (ay kujirto horjoogid caruurta ah kuwaas oo kucaawiya diyaarinta cuntada lagu diyaariyo jikada, ayada oo ay tahay mid kusalaysan da'dooda iyo xirfadahooda).

(2) Kama tegi doono caruurta kayar da'da shan sanno iyo caruurta qabta horumarin naafonimo daran, oo aan imaan karin musqusha ama qubeyska; ama isticmaala sariiraha ilmaha, baafaf, ruxe ama lule, sariirta shaqaba leh ee kor kafeydan ee ilmaha cuyaaraan, iyo baalal bedel u ah horjoogida ama ciyaar mid-mid-ah oo lala ciyaaro dhallaanka iyo caruurta yar-yar.

(3) Waxaan siin doonaa caruurta kujirta daryeelkayga horjoogid munaasab ah, taageero dareen, daryeel shakhsiyeed, hawl maalmeed qaabeysan iyo khibrado noolaansho.

(4) Waxaan habeyn doonaa oona sii wadi doonaa horjoogid kufilan inta lagu guda jiro waqtiyada khatarta ah marka hal ama xubno baddan oo qoyska ahi aan la heli karin in ay bixiyaan horjoogida lagama maarmaanka ah ama ceymis kujirida loogu talogalay caruurta kale ee kujirta daryeelka.

(5) Waan fahansanahay in qabanqaabooyinka horjoogida khaaska ah loo baahan karo marka shaqaalaha ilmaha loo xilsaaray iyo aniga aan isku raacno qorshaha horjoogidda (waalidiinta korinta waxaa lagu boorinayaa in ay la shaqeeyaan shaqaalaha ilmaha loo xilsaaray si loo sameeyo qorshaha horjoogida ilmaha-gaarka ah).

Waan oggolahay in aan u hoggaansamo dhammaan shuruudaha kor lagu sheegay oona siino horjoogid munaasab ah caruurta korinta kujirta daryeelkayga.

SIXIIXA XIRIIRKA AASAASIGA AH	TAARIIKHDA
SIXIIXA XIRIIRKA LABBAAD:	TAARIIKHDA

Soo sheegida Masuuliyadaha

WAC 110-148-1420

Waan akhriyey oo waan fahmey shuruudahayga loogu talogalay u soo sheegida shaqaalaha qaadashada ee DCYF iyo/ama shaqaalaha ilmaha loo xilsaaray. Waan fahansanahay in ay khasab igu tahay in aan usoo sheego si dhakhso ah dhacdooyinka muddo aanan kayarayn 48 saacadood.

SIXIIXA XIRIIRKA AASAASIGA AH	TAARIIKHDA
SIXIIXA XIRIIRKA LABBAAD	TAARIIKHDA

Hubka iyo Horjoogida

WAC 110-148-1500

Waan fahansanahay in ay khasab igu tahay:

(1) Kuwargeliyo rukhsad bixiyahayga haddii Aniga ama qofkale oo jooga gurigayga uu haysto qori ama hub guriga u yaala. Middaan waxaa kamid ah laakiin aanan ku ekayn qoriyaha BB, qoriyaha soodhka, qoriyaha hawada, qoriyaha elektarooniga ah, qoriyaha qadiimka ah, bustoolooyinka, qoriyaha u gaarta, qoriyaha darandooriga u dhaca iyo qalabka toogashada.

(2) Qoryaha iyo rasaasta waa in aanan helin ama gaarin caruurta, waana in lagu geliyo weel/meel xiran iyadoo si kala gaar ah qoryaha iyo rasaasta loogu xirayo meelo kala duwan, haddii lagu kaydiyo khasnadda qoryaha lagu kaydiyo oo xiran mooyaane.

(3) Qaansooyinka iyo fallaaraha iyo hubka kale waa in lagu kaydiyo weelal xiran oo aysan carruurta gaari karin.

(4) Haddii aan ku keydiyo qoriyaha meel si sahal ah loo jebin karo, Waxaa khasab igu ah in aan ku keydiyo silsilad xiran middaas oo lagu xiro tooska ilaaliyaha farganka.

(5) Markasta oo ay suurtogaltahay, waxaan kugu boorinaynaa in aad qoriyaha kuxirtid ilaaliye farganka ah.

(6) Waa in aan dhigaa furayaasha lagu xiro meesha hubka lagu keydiyo meel kafog caruurta.

(7) Caruurta waxay isticmaali karaan qori keliya haddii shaqaalaha ilmaha oggolaado iyo haddii dhallinyarka iyo horjoogaha weyn ay dhammeystaan koorsada loogu talogalay ammaanka qoriga ama ugaarsashada.

☐ Majiraan wax hub ah oo yaala gurigayga/korinta aniga/anagana waan oggolnahay in aynu kuwargelino rukhsad bixiyahayga haddii aniga/anaga keeno wax guriga

Ama

☐ Hub ayaa yaala gurigayga/gurigeena korinta.

SIXIIXA XIRIIRKA AASAASIGA AH	TAARIIKHDA
SIXIIXA XIRIIRKA LABBAAD	TAARIIKHDA

Ammaanka Biyaha iyo Horjoogida

WAC 110-148-1455

Waxaan hubsan doonaa in caruurta kuhoos jirta daryeelkayga ama la geliyay gurigayga ama xarunta ay yihiin kuwo ammaan ku ah xareeraha biyaha. Waxaan ka dhigi doonaa dhammaan barkadaha lagu dabaasho iyo meelaha kale ee biyaha ku jiraan kuwo gidaar leh oo ku xiran albaab ama qalab kale oo DCYF-oggolaatay oo ammaan, xir tuubadaha kulul marka aanan la isticmaalin, ka dhig dhammaan meelaha biyaha khatarta leh ee suurtagalka ah, oo ay ka mid yihiin barkadaha ay carruurta dabaashaan, kuwo aan gelin caruurta marka aan la isticmaalin.

Waxaan hubsan doonaa in dhammaan barkadaha qubeyska ama dabaasha iyo meelaha kale ee biyaha kujira ay yihiin kuwo u hoggaansan xeerarka gobolka ama dalka. Waxaan lashaqayn doonaa rukhsad bixiyahayga si aynu u sameyno qorshe loogu talogalay meelaha ay biyuhu kujiraan ayada oo ay kusalaysantahay heerka horumarka iyo dhaqamada caruurta kunool gurigayga.

Waxaan ilaalin doonaa kuwaan soo socda haddii caruurta korinta ay kudabaalanayaan barkadaha iyo meelaha biyuhu kujiraan ee banaanka ah:

(a) In ay kudabaashaan keliya meelaha loogu talogalay in lagu dabaasho; ama

(b) In looga baahanyahay dhammaan caruurta in ay ahaadaan da'da seddex iyo toban iyo kayar si ay u xirtaan qalabka sabadaynta shakhsiyeed ee Ilaalinta Xeebta-la oggolaaday ee Wadanka Mareykanka marka ay kudabaalanayaan meel kabaxsan horjoogida waardiyaha.

Haddii aan qabo wax qalab madadaalo kusalaysan-biyaha, Waxaa khasab igu ah in aan isticmaalo una sii ilaaliyo si waafaqsan talooyinka sameeyaha. Dhammaan caruurta iyo dhallinyarada kuwaas oo fuula qalabka madadaalada kusalaysan-biyaha waxaa khasab ku ah in ay xirnaadaan qalabka sabadaynta shakhsiyeed ee Ilaalinta Xeebta-la oggolaaday ee Wadanka Mareykanka waqti kasta. Qof weyn oo qaba da' hadda ah-oo munaasab ku ah gargaarka koowaad iyo CPR ama waardiyeyn ayay khasab tahay in uu horjoogo caruurta dabaalanaya kuwaas oo ah kuwo kayar da'da labbo iyo tobban, waana in uu awoodaa in uu marwalba arko oona maqlo caruurta. Caruurta kayar da'da shan sanno waxaa khasab ku ah in ay ahaadaan meel uu kagaari karo qofka weyn ee horjoogaha ah ama waalidka dhalley markasta.

SIXIIXA XIRIIRKA AASAASIGA AH	TAARIIKHDA

SIXIIXA XIRIIRKA LABBAAD	TAARIIKHDA

Tallaalid loogu talogalay Caruurteyda

WAC 110-148-1320 (5) iyo (6)

Dooro dhamaan kuwa khuseeya.

A. ☐ Caruurteyda waa kuwo loo talaaley sida waafaqsan Guddiga Latalinta kusaabsan Sameynta Tallaalka ee Xarumaha loogu talogalay Xakameynta Cudurka. Waxaan tusin doonaa rukhsad bixiyahayga xaqiijinta tallaaladaan booqashada guriga. Waxaan sii wadi doonaa in aan kadhigo caruurteyda kuwo ay cusboonaato taariikhda tallaaladaan. Waxaan laxiriiri doonaa rukhsad bixiyahayga haddii qofkasta oo jooga gurigayga uu qaado wax cudur la isqaadsiiyo ah ama jiro kasta oo laga tallaalay ayaga. Waqtigaas wax wareejin ah laguma sameyn doono gurigayga illaa cudur keenaha ka gudbo. Haddii la iila soo xiriiro meelayn, dib ayaan u dhigayaa illaa cudur keenaha ka gudbo. Waxaan la hadli doonaa rukhsad bixiyahayga marka cudur keenaha uu gudbo si wareejin la'aanta loo qaado.

☐ Caruurteyda laguma sameynin tallaalid middaas oo ay sabab u tahay diinteyda, arin shakhsiyeed, arin falsafadeed, ama kareebid caafimaad darteeda. Waxaan laxiriiri doonaa rukhsad bixiyahayga si aan u helo Shahaadada Kareebida DCYF 15-455 oona ula shaqeeyo bixiyahayga caafimaadka si aan u helo ayada oo dhammeystiran.

Qaadashada meelaynta loogu talogalay caruurta kayar da'da labbo sanno.

B. ☐ Dhammaan xubnaha qoyska waxay haystaan xaqiijin cudurka xiiq dheerta iyo tallaalo hargabka sannadle ah.

☐ Xubnaha qoyska waa kuwo hadda wada helida katallaalida cudurka xiiq dheerta iyo/ama hargabka.

☐ Xubinka qoyska waxaa laga reebay tallaalka ifilada, iyadoo sabab u ah cawaaqib caafimaad oo daran. Xubinka qoyska waxaa uu kala shaqeyn doonaa bixiye caafimaad in uu buuxiyo Ka-reebnaanta Caafimaadka DCYF

15-565 ee loogu talogalay Tallaalka Ifilada.

☐ N/A Maqaadan doono meelaynta caruurta kayar da'da labbo sanno.

FIIRO GAAR AH: Ka-reebitaanada lama siin karo tallaalada xiiq-dheerta ee loogu talogalay qoysaska qaadanaya meelaynta caruurta ka yar da'da labo sano.

SIXIIXA XIRIIRKA AASAASIGA AH	TAARIIKHDA
SIXIIXA XIRIIRKA LABBAAD	TAARIIKHDA

Keydinta Daaweynta

WAC 110-148-1565

(1) Warqada qoraalka iyo daawooyinka lasoo iibsado ayaga oo aan wadan warqad dhakhtar waa in lagu hayo meel xiran.
(2) Daawada gudaha ah iyo mida dibada ah waa in loo keydiyo si kala gooni ah.
(3) Daawada banii'aadamka iyo daawada xayawaanka waa in loo keydiyaa si kala gooni ah waana in lagu xiraa meel xiran.

SIXIIXA XIRIIRKA AASAASIGA AH	TAARIIKHDA
SIXIIXA XIRIIRKA LABBAAD	TAARIIKHDA

☐ **Waan akhriyey waana muraajaceeyay buugg yaraha WAC 110-148 waana oggolahay in aan u hoggaansamo dhammaan shuruudaha rukhsadeynta.**

SIXIIXA XIRIIRKA AASAASIGA AH	TAARIIKHDA
SIXIIXA XIRIIRKA LABBAAD	TAARIIKHDA